

Xeerla L. 153 rep

Isbeddelada ku saabsan qeybsiga siyaasadeed iyo maamul – Baa'abinta Guddonka Gobolka Shabellaha Hoose – Dhisidda Gobolka Webi Shabeelle - Ku wareejinta saldhigga Guddomiyaha Gobolka Mudug magaalada Galkacyo.

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA
MAAMULAHA**

Kadib marki la arkay sharciga lamba.12 Febaayo ee 1950;

Kadib marki la arkay amar-sharci lamba. 8 ee 12 Abriil 1950 oo khuseeya nidaamka maamulidda dalka Somaliya;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la nidaamiyo kala qeybinta dhinaca maamulka iyo siyaasadda ee Dalka si loo haajiyo danaha guud ee aagaga dhulka iyo isbedelka iyo baahida dadka ku nool halkaasi.

WAXAA LA AMRAY

Qod. 1

Laga bilaabo 30ka Juune waxaa gebi ahaanba la baa'bieyey Guddonka Gobolka Shabellaha Hoose.

Degmooyinka Marka iyo Baraawe oo horay uu hoos tagi jiray Gobolkaasi waxa ka mid noqon doonaan laga bilaabo 1da Luulyo 1951 Guddonka Gobolka Banaadir.

Qod. 2

Laga bilaabo 1da Luulyo 1951, waxaa la dhisay Gobolka Webi Shabeelle oo magala madaxdiisu tahay Beled/Weyne.

Guddonkaasi wuxuu ka koobnaa doona degmooyinka:

- 1) Bullo Burti;
- 2) Beled Weyne;
- 3) Jowhar (Villaggio Duca degli Abruzzi);
- 4) Balcad (Italia).

Degmooyinka Jowhar iyo Balcad oo horay ugaga tirsanaa Gobolka Banadir waxay ka mid noqon doonaan aagga Gobolka Webi Shabeelle.

Qod. 3

Laga bilaabo 1da Luulyo 1951 saldhigga Guddomiyaha Gobolka Mudug waxaa lagu soo wareejiyey magaalada Galkacyo.

Aaga Gobolkaasi wuxuu ka koobnaan doonaa degmooyinka soo socda:

- 1) Galkacyo;
- 2) Ceel Buur;
- 3) Dhusamareeb;
- 4) Hobyaa.

Degmoyinka Beled/Weyne iyo Bulo Burte oo horay uga tirsaan Gobola Mudug wax aka mid noqon doonaan Gobolka Webi Shabelle.

Maamulaha

Fornari

Muqdisho, 25 Juun 1951.

Waxaa la arkay lana diiwaan geliyey lamb 863 ee Diwaanka Dekreetoyina
25 Oktober 1952